

JAMHUIRIYADDA  
SOMALILAND



REPUBLIC OF  
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQQAANKA GUUD EE QARANKA  
SOLICITOR GENERAL OFFICE

FAAFINTA RASMIGA AH  
OFFICIAL GAZETTE

النَّشْرَةُ الرَّسْمِيَّةُ لِجَمْهُورِيَّةِ سُومَالِيلَانْد

Sannadka 13aad

Cadad Gaar ah

Taariikhda la  
daabacay  
13/03/2024

WAX-KA-BEDELKA IYO KAABISTA XEER  
NIDAAMKA URURRADDAA IYO AXSAABTA  
SIYAASADDA  
XEER LR:14/2023

Web. [www.garyaqqaankaguud.com](http://www.garyaqqaankaguud.com)

Lama iibin karo  
Not for sale

Sannadka 2024

JAMHUURIYADDA

SOMALILAND



## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-1224/032024

Taar: 09/03/2024

## Wareegto Madaxweyne

Dhaqan-galka Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka  
Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda Xeer Lr: 14/2023

Markaan Arkay: Qodobka 90<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodebbada 75<sup>aad</sup>, 77<sup>aad</sup> iyo 78<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qoraalka Golaha Wakiillada ee summaddiisu tahay GW/JSL/10/68/2024, kuna taariikhaysan 19/02/2024, Ujeeddadiisuna tahay Soo Gudbinta Go'aanka Ansixinta Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda ee Xeer Lr: 14/2023, (Go'aan Lr. GW/KF- 7/02/2024);

### Waxaan soo-saaray;

Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda ee Xeer Lr: 14/2023.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



The Republic of Somaliland  
House of Representatives  
Head Quarter Hargeisa.



Jamhuuriyadda Somaliland  
Golaha wakiilada

Xarunta Hargeisa

Ref: Gw/C/1/1ef-7/02/2024

Date: 19 02 2024

**Ujeedo: Go'aanka ansixinta wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka  
Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda**

**Xeer Lr. 14/2023**

## **GOLAHA WAKILLADU:**

**Markuu Arkay: -**

Qodobka 4<sup>aad</sup> faqraddiisa 1<sup>aad</sup>, Qodobka 9<sup>aad</sup> faqraddiisa 1<sup>aad</sup>, Qodobka 22<sup>aad</sup> faqraddiisa 3<sup>aad</sup> iyo Qodobbada 40<sup>aad</sup>, 41<sup>aad</sup>, 42<sup>aad</sup>, 82<sup>aad</sup>, 77<sup>aad</sup>, 78<sup>aad</sup>, 83<sup>aad</sup> 111<sup>aad</sup> faqraddiisa 2<sup>aad</sup> ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu Arkay**

Dastuurka Qodobka 78<sup>aad</sup> Farqadda 1<sup>aad</sup> xarafkiisa (T) oo sheegaya in Golaha Wakiilladu xaq u leeyahay inuu ku celiyo Golaha Guurtida kal-fadhiga xiga, haddii uu ku qanci waayo wax-ka-beddelka Golaha Guurtida.

**Markuu Arkay: -**

In ay muhiim tahay in laga faa'iidaysto waayo'aragnimadii laga dhaxlay doorashooyinkii kala duwanaa ee ay soo martay bulshada Somaliland, taas oo muujinaysa in loo baahan yahay in la'adkeeyo nidaamka sharci ee suurto gelinaaya in ay muwaaddiniintu codkooda ku dhiibtaan, isla markaana la'tirtiro in ay dhacdo in lagu noqnoqdo cod-bixinta taasoo sharcidarro ah.

**Markuu Aqoonsaday:**

Baahida loo qabo in dib u habeyn, wax-ka-beddel iyo kaabis lagu sameeyo, dibna loo eego xeerarkii doorashooyinka Madaxtooyada, Golaha Wakiillada iyo goleyaasha deegaanka, sidoo kale Xeerkii Diiwaan-galinta Cod-bixiyayaasha.

Website: [www.somalilandparliament.net](http://www.somalilandparliament.net)



- Markuu Arkay:** Soo jeedinta Madaxweynaha ee iswaafajinta xeerarka Doorashooyinka iyo go'aannadii odayaasha guddida khilaafaadku ka soo saareen xaaladda siyaasadeed ee dalka, taas oo si doorashooyinku ugu dhacaan wakhtiga la'isla qaatay loo baahan yahay in dib u habeyn, wax-ka-beddel iyo kaabis lagu sameeyo Xeerka Guud ee Doorashooyinka Qaranka iyo Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha Xeer Lr. 91/2023.
- Markuu u codeeyey:** Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda kal-fadhigii 7<sup>aad</sup> fadhibisi 11<sup>aad</sup> taariikhduuna ku suntanayd 15/01/2023 oo ay goob joog ahaayeen (71) mudane oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiillada.
- Markuu Arkay:** In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyeen kuna ansixiyeen (66) cod wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadda, Xeer Lr. 14/2023, kuna taariikhaysnaa 17/02/2023

## Wuxuu:

Cod aqlabiyad ah oo (**59 cod**) oo gacan taag ah ku ansixiyay Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka nidaamka Ururada iyo Axsaabta Siyaasada, Xeer Lr. 14/2023, halka 12 mudane ka diideen, hal (1) mudane ka aamusay, Guddomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.

### ALLAAMAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiliada JSL

Yaasiin X. Maxamuud Xiir (Faratoon )  
Guddoomiyaha Golaha Wakiliada JSL



# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHADHADU WAKIILLADU

- Markuu arkay:** Qodobka **39<sup>aad</sup>** iyo **53<sup>aad</sup>** , **76<sup>aad</sup>** **77<sup>aad</sup>** ee Dastuurka Qaranka JSL.
- Markuu arkay:** Go'aan **Lr. GW/KF-6/968/2023** ee Goluhu ku ansixiyey soo jeedinta Madaxweynaha ee arrimaha doorashooyinka iyo in lays waafajiyo Xeerarka Doorashooyinka Guud iyo Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha Xeer Lr.91 iyo Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Qaranka Xeer Lr.14.
- Markuu dhegeystay:** Soo jeedintii Guddidii gaarka ahayd iswaafajinta Xeerarka Doorashooyinka ee Golaha Wakiillada.
- Markuu Arkay:** Baahida loo qabo in la' helo Xeerar Dhammaystiran oo dabooli kara dhammaan baahiyaha ku saabsan arrimaha Doorashooyinka Qaranka.
- Markuu Tixgeliyey:** In la' helo Xeerar lagaga bixi karo Daruufaha Siyaasadeed ee Maanta ka jira dalka JSL.

### WUXUU ANSIKIYEY

Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Ururada  
iyo Axsaabta Siyaasadda

Xeer Lr. 14/2023



**CUTUBKA 1AAD**  
**MABAADII'DA GUUD**

**Qodobka 1aad**

**Erey bixin**

- Guddi:** Waxa loola jeedaa Gudidda diwaangelinta ururrada siyaasadda iyo Ansixinta xisbiyada Qaranka.
- Komishan:** Waxa loola jeedaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka (KDQ).
- Gobol/Degmo:** Waxa loola jeedaa gobollada iyo degmooyinka ku xusan Xeer **Lr. 23/2019**.
- Urur Siyaasadeed:** Waxa loola jeedaa koox muwaaddiniin ah oo wadaaga fikir siyaasadeed oo midaysan isuna diiwaangeliya urur ahaan, haystana shahaadada hawlalka, si ay uga qayb qaataan doorashooyinka loogu tartamo ee loogu soo **baxayo xisbi qaran**.
- Xisbi/Xisbiyo Qaran:** Waxa loola jeedaa **Axsaabta** Qaran ee loo ansixiyay si ay uga qayb qaataan doorashooyinka, kuwaas oo la siiyay liisanka xisbinimo, isla markaasna leh jiritaan qaunuuniya **muddada ku xusan xeerkan**.
- Ajanabi:** Waxa loola jeedaa shakhs kasta oo aan u dhalan ama aan haysan jinsiyadda Jamhuuriyadda Somaliland sida ku cad qodobka 4aad ee Dastuurka iyo xeerka Jinsiyadda.
- Warbaahinta Dawladda:** Waxa loola jeedaa idaacadaha, wargeesyada, Telefishanka Qaranka iyo nooc kasta oo warbaahineed oo ay dawladdu maamusho.
- Hantida Dawladda:** Waxa loola jeedaa hantida guurtada ah iyo ma'guurtada ee ay dawladdu leedahay nooc kasta ha'ahaatee.
- Arjiga Codsiga:** Waxa loola jeedaa foom gaar ah oo uu diyaariiyay gudidda diwaan-gelinta ururrada siyaasadda iyo ansixinta xisbiyada oo faahfaahinaaya shuruudaha laga rabo in uu buuxiyo urur siyaasadeed kasta oo is diwaangelinaya.
- Doorashooyinka Qaranka:** Waxa loola jeedaa habka cod-bixiyayaashu ay si toos ah ugu soo doortaan Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha, xubnaha Golaha Wakiillada iyo saddexda xisbi qaran si'waafaqsan Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha, Xeer Lr. 91/2023.



**Hoggaanka Xisbi/Urur Siyaasadeed:** Waxa loola jeedaa hoggaanka sare ee xisbi/urur oo uu ka mid yahay guddoomiyaha, gudoomiye ku-geennada, Xog-hayaha Guud iyo ku-xigeenkiisa.

### **Qodobka 2aad**

#### **Xadka Adeegsiga Xeerkan**

1. Xeerkan waxa lagu dhaqayaa diiwaangelinta, ansixinta, dimuquraadiyadaynta iyo nidaaminta ururrada iyo xisbiyada siyaasadeed ee Somaliland.
2. Habka tartanka doorasho ee ururrada iyo xisbiyadda mudadda liisankooda xisbinimo dhammaanaayo ee ay ugu gudbayaan xisbinimo waxa tilmaamaya oo lagu dabbaqayaa Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha, Xeer Lr. 91/2023.

### **Qodobka 3aad**

#### **Mabaadii'da Guud ee Xeerka**

- 1) Xisbiyada/ururradu waa in ay u hoggaansanaadaan Dastuurka oo ku dhisan Shareecda Islaamaka iyo xeerkarka dalka. waana in aanu wax u dhimaynin midnimada dalka, israacsanaanta dhul ahaaneed ee Jamhuuriyadda Somaliland iyo nabadgelyada guud.
- 2) Xisbiyada/ururradu waa in ay ka qayb qaataan in ay taageerayaashooda baraan tartanka doorashooyinka iyo dimuqraadiyadda, waana in ay tixgelin dheeraad ah siiyan haweenka iyo dhallinyarada.
- 3) Xisbiyada/ururradu waa in aanay ku salaysnayn qabiil, gobolaysi, lab ama dheddig keliya ama qaab kale oo kasta oo bulshada kala faquuqaaya.
- 4) Xisbiyada Qaranka iyo ururradu waxa lagu maamulayaa si'waafaqsan xeerkan, isla markaana aan ka soo hor jeedin shareecada Islaamka, Dastuurka Qaranka, xeerkarka dalka iyo xeer-hoosaadyada xisbiyada ama ururrda.
- 5) Muwaaddin kasta oo u dhashay Somaliland oo buuxiya shuruudaha ku xusan xeerkan wuxuu xaq u yeelanayaa in uu samaysto, isu habeeyo urur siyaasadeed si' waafaqsan xeerkan iyo Qodobbada 22aad iyo 23aad ee Dastuurka JSL.

### **Qodobka 4aad**

#### **Ujeeddooyinka Xeerkka**

Ujeeddooyinka xeerkku waa:

1. In la' helo xeer loo raaco hannaanka kala xulista xisbiyada/Urrurada iyo diiwaangalintooda;
2. In lagu jideeyo masuuliyadaha guud ee xisbiyada, hoggaankooda iyo hannaanka xil-gudashadooda.
3. In lagu dhiso Guddida Diiwaanglinta Ururrada iyo Ansixinta Xisbiyada Qaranka isla markaana waajibaadkoodda lagu qeexo.



4. In la helo xeer ku ilaalinaaya xisbiyadda/ururradda siyaasadeed ee dalka ka jira hannaanka ama xayndaabka Dastuurka iyo xeerarka dalka, si loo xoojiyo dimuquraadiyadda ka dhex jirta ururradda iyo xisbiyada siyaasadeed ee qaranka.
5. In la helo xeer lagu maamulo, kobciyo, sarena loogu qaado hannaanka axsaabta badan gudaha JSL, si'waafaqsan Dastuurka qodabkiisa 9aad.

## CUTUBKA 2AAD

### QAAB DHISMEEDKA IYO XILKA GUDDIDA DIIWAANGELINTA

#### Qodobka 5aad

#### Aasaaska Guddida Diiwaangelinta

1. Xeerkan waxa lagu aasaasay Guddi gaar ah oo madaxbannaan, una xilsaaran diiwaangelinta ururrada siyaasadda iyo ansixinta axsaabta qaranka si'waafaqsan qodobka 113 iyo 9aad ee Dastuurka JSL.
2. Xubnaha Guddidu waxa ay ka kooban yihiin toddobo (7) xubnood.
3. Muddo xileedka guddidu waa shan sannadood (5) oo ka bilaabmaysa taariikhda la dhaariyo Madaxwaynuhuna waa u cusboonaysiin karaa, marka uu ka dhammaado Wakhtigoodu haddii loo baahdo, iyada oo muddo kordhintaas cusub laga ansixin doono Golaha Wakiillada.
4. Guddida Diiwaangelintu waxa ay leedahay shaqsiyad qaunuuni ah oo madaxbannaan.

#### Qodobka 6aad

#### Qaab-dhismeedka Guddida

1. Qaab-dhismeedka Guddidu waa:
  - b. Tirada Guddida oo ka kooban (7) xubnood oo kala ah, Guddoomiye, Guddoomiye ku-xigeen, Xoghaye iyo Afar (4) xubnood oo kale.
  - t. Guddidu waxa ay iska dhex dooranaysaa guddoomiye, guddoomiye xigeen iyo xogmeye.
2. Guddidu waxay yeelanaysaa Agaasime Guud oo lagu soo magacaabo si'waafaqsan Qodobka 90aad faqraddiisa 3aad xarafka (kh) ee Dastuurka.
3. Agaasimaha Guud waa madaxa shaqaalaha, waxaanu guddida ka gacan siin doonaa fulinta iyo habsami u socodsinta shaqadooda maalin laha ah.
4. Guddida xarunteeda guud waa magaalo madaxda Somaliland ee Hargeysa, waxaanay xafiisyo ku yeelan kartaa Gobollada dalka JSL.

#### Qodobka 7aad

#### Shuruudaha magacaabista Xubnaha Guddida

Guddida waxa lagu soo **magacaabayaa** shuruudaha hoos ku qoran:-

- b. Inuu muslin yahay/tahay, kuna dhaqmo diinta Islaamka.
- t. Inuu muwaaddin yahay/tahay, da'diisuna ka yaraan 40 sanno, kana waynaan 65 sanno.
- j. Inuu/inay jidh ahaan iyo caqli ahaanba u gudan karo xilkiisa.
- x. Inuu/inay leeyahay aqoon wax barasho oo gaadhsiisan shahaadada koowaad ee jaamacadda (First degree) oo ah jaamacad la'aqoonsan yahay.



- kh.** In aanu/inaanay hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo kama dambays ah oo maxkamad horteed kaga caddaaday shantii sanno ee u dambaysay.
- d.** Inuu/inay yahay xilkas, dhaqankiisa iyo akhlaaqdiisuna toosan yihiin, yahayna shakhsii ku sifoobay dhexdhedaadnimo iyo caddaalad.
- r.** Inuu/inay leeyahay waayo'aragnimo shaqo iyo maamul oo dawladnimo oo dhan 5 sanadood ugu yaraan.
- s.** in aanu/aanay ka tirsanayn xisbi ama urur siyaasadeed isla markaana aanu ka qaybgelin hawl olole ama taageero urur ama xisbi siyaasadeed.
- sh.** Halka sharci yaqaan waxa u dheer shuruudahaasi inuu/inay yahay qof ku shaqeeyey qareennimo (practising lawyer), macallin jaamacadeed Sharci, garsoore ama xeer-ilaaliye ugu yaraan 5 sanno.

### **Qodobka 8aad**

#### **Magacaabista xubnaha Guddida**

1. Xubnaha Guddida Diiwaangellinta wawa magacaabaya Madaxwaynaha isaga oo raacaya shuruudaha xubinimo ee ku cad qodobka 7aad ee xeerkana.
2. Golaha Wakiillada ayaa kalabadh iyo hal (41+1) tirada guud ee xubnaha Golaha ku ogolaanaya guddida diwaan galinta ururrada siyaasadda iyo axsaabta qaranka.
3. Iyadoo la dhawraayo mabda'a ku xusan qodobka 37 aad, faqraddiisa 2aad iyo qodobka 53aad, faqraddiisa 1aad ee Dastuurka Somaliland, haddii xubin ama xubno ka mid ah xubnaha guddida uu Golaha Wakiilladu ku ansixin waayo codka ku xusan farqadda 2aad, Madaxwaynuhu haddii uu u arko inay shuruudihii buuxiyeen hal mar ayuu dib ugu soo celin karaa Golaha Wakiillada.
4. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ayaa ku dhaarinaya Guddida dhaartan, toddobaad ka dib maalinta Golaha Wakiilladu ansixiyo (WAXAAN ILAAHAY UGU DHAARTAY IN AAN U NOQONAYO DAACAD DIINTA ISLAAMKA, DALKAYGA SOMALILAND, DADKIISANA KU MAAMULAYO SINNAAN IYO CADDAALAD INTA AAN XILKA HAYO KANA MID AHAYN KUNA JIRIN URUR IYO XISBI QARAN).

### **Qodobka 9aad**

#### **Bannaanaanshaha xubinnimada Guddida**

1. Xubinta guddidu waxa ay bannaanaan kartaa haddii:
  - b) Xubantu is casisho,
  - t) Xilka looga qaado si lamida habka xilka looga qaado gudida komishanka doorashooyinka
  - j) Xubantu geeryooto.
  - x) Ay burto shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo magacaabay ee ku cad qodobka 6aad ee Xeerkana.
  - Kh) Uu gudan kari waayo xilka karti darro ama caafimaad darro awgeed.
  - d) Ay ku kacdo falal anshax xumo, xatooyo, musuq maasuq ama eex.
2. Haddii xubin ka mid ah Guddidda ay banayso xubinnimada Gudidda, Madaxwaynaha ayaa bedelkeeda soo buuxin doona, Xubinta cusub waxa ay dhammaysan doontaa muddo xileedka u hadhsan Gudidda.



3. Xubinta/naha cusub waxa ansaxinaya Golaha Wakiilada inta aan xilka loo dhaarin

**Qodobka 10aad**  
**Xilka iyo waajibaadka guddida**

Guddida Diiwaangelinta waxa ay u xilsaaran tahay:

1. Diiwaangelinta ururrada siyaasadeed si'waafaqsan habraaca ku cad xeerkan.
2. Bixinta shahaadada ku meel gaadhka ah ee ururrada la diiwaangeliyay si ay ugu hawlgalaan ka hor doorashada.
3. Bixinta liisanka rasmiga ah ee saddex xisbi qaran ee ku guulaysta tartanka doorashada si'waafaqsan natijjada ay soo saarto Guddida Doorashooyinku.
4. Fullinta iyo dhaqan-gelinta qodobbada xeerkan.
5. Kormeerka, kor-joogtaynta iyo nidaaminta ururrada iyo xisbiyada siyaasadeed si ay u hubiyaan in ay raacaan Dastuurka, xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka iyo xeer-hoosaadyadooda.
6. Hubinta in xisbiyada iyo ururradu ku dhaqmaan mabaadii'da dimoqraadiyadeed ee hufnaanta oo ay ka mid yihii in xisbiyada/ururrada dheddooda ay ka dhacdo doorasho xor iyo xalaal ah, kana jirto gudahooda nidaam daahfur oo dimuquraadiyadeed kuna dhisan wax wadalahaansho.
7. ka garnaqista cabashooyinka ka soo baxa xisbi/urur dhediisa go`aankooda waxa looga racfaan qaadanaya haddi lagu qanci waayo Maxkamada Sare.
8. Tayaynta iyo sare u qaadista kartida ururrada iyo xisbiyada siyaasadeed.
9. In ay xubno ka tirsan guddidu u xilsaarto hawl gaar ah oo la'xidhiidha shaqadeeda.

**Qodobka 11aad**  
**Kulamada Guddida**

1. kulamada guddidu waxa ay noqn karaan kulamo caadi ah iyo kuwo aan caadi ahayn.
2. Kulamada guddidu waxa ay qabsoomayaan marka ay joogaan ugu yaraan afar (4) xubnood.
3. Kulamada caadiga ahi waxa ay dhacayaan bil kasta hal mar.
4. Kulamada aan caadiga ahayn waxa ay dhacayaan marka uu soo jeediyo guddoomiyuhu ama ugu yaraan saddex xubnood oo guddida ah.
5. Marka lagu jiro diiwaangellinta ururro cusub, kulamada caadig ah ee guddidu waxa ay noqonaysaa kuwo joogto ah.
6. Go'aamada guddidu waxa ay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.

**Qodobka 12aad**  
**Waajibaadka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka**

1. Guddidu waxa ay iska dhex dooranaysaa guddoomiye iyo guddoomiye ku-xigeen.
2. Xilka guddoomiyuhu waa:
  - b. In uu guddoomiyo kulamada guddida kuna hadlo afka guddida.
  - t. In uu fuliyo oo dabo galo go'aamada guddidu gaadho.



- j. In uu socodsiiyo hawlaha maamul iyo maalin leh ee guddida.
3. Guddomiye Ku-xigeenku waxa uu qabtaa xilka guddoomiyaha marka uu maqan yahay guddoomiyuhu iyo hawlaha kale ee guddoomiyuhu u xilsaaro.

**Qodobka 13aad**  
**Madaxbannaanida Xubnaha Guddida**

Guddidu way u madax bannaan tahay xil gudashadeeda muddada ay xilka hayaan. Habka xil ka xayuubinta xubnaha guddida iyadoo laga duulayo Qodobka 96aad ee Dastuurka, haddii ay ku kacaan khiyaamo qaran ama/yo ku xadgudub Dastuurka iyo xeerkan, Madaxweynaha ayaa xeer-ilaaliya ka dalbanaya inay soo baadhaan si loogu soo oogo, hadii lagu helo Madaxweynaha ayaa xilka ka qaadaya.

**Qodobka 14aad**  
**Miisaanniyadda iyo Gunnada Xubnaha Guddida**

1. Guddidu waxa ay qoondo ku yeelanaysaa miisaanniyadda qaranka.
2. Habka maamulka xisaabaadka iyo hanti-dhawrka waxa ay guddidu u raacaysaa xeerarka maaliyadda ee dalka u yaal.
3. Xubnaha guddidu waxay yeelanayaan gunno la'mid ah gunnada Komishanka Doorashooyinka la'siyo.

**Qodobka 15aad**  
**Shaqaalaha guddida**

1. Guddidu waxa ay u qoranaysaa shaqaalaha si'waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda.
2. Shaqaalaha Guddidu waa in ay ku shaqeeyaan dhedhexaadnimo oo ay ka fogaadaan wax kasta oo dhanic u xaglin ah, eex, sinnaan la'aan, dhedhexaadnimo la'aan ah ama ka mid ahaansho xisbi ama urur.
3. Guddidu waxa ay qoran karaan la-taliyayaal khibrad gaar ah leh oo ay ugu muhiimsanyiin sharciyqaanno iyo khabapiro ku xeel dheer arrimaha demuquraadiyadda iyo doorashooyinka.



**CUTUBKA 3AAD**  
**HABRAACA DIIWAANGELINTA URURRADA**  
**QAYBTA 1AAD**

**WEJIGA KOOWAAD EE DIIWAANGELINTA URURRADA CUSUB**

**Qodobka 16aad**  
**Muddada bilawga abuurista ururrada cusub**

1. Tobankii (10) sannadoodba mar baa la'abuuri karaa urur siyaasadeed si waafaqsan xeerkan. Hase'ahaatee waa in urur siyaasadeed la'abuuraa sannad ka hor **dhammaadka muddada liisanka, iyadoo la qabanaayo doorashada tartanka lagu kala saarayo ururrada iyo xisbiyda bil ka hor dhamaadka muddada liisanka xisbiyada.**
2. Iyaga oo laga duulayo qodobka 23aad , faqraddiisa 3aad iyo Qodobka 22aad, faraddiisa 1aad ee Dastuurka, muwaaddiniintu waxa ay xaq u leeyihin inay isku abaabulaan ururro siyaasadeed si'waafaqsan qodobbada xeerkan.
3. Qabashada codsiyada diiwaangelinta urutradu waxa ay bilaabmaysaa sannad ka hor taariikhda uu dhacayo liisanka saddexda xisbi.

**Qodobka 17aad**  
**Shuruudaha ururrada siyaasadeed ee cusub**

1. Urur kasta oo doonaya in loo diiwaangeliyo urur siyaasadeed waa in uu ku soo qortaa arji foomka loogu talagalay, kuna soo hagaajiyaa guddida, kuna lifaaqnaadaan caddaymaha iyo qoraallada soo socda:-
  - a) Goortii iyo goobtii ururku ku qabtey shirkii aasaaska ee ugu horreeyay.
  - b) Liiska magacyada aasaasayaasha ururka iyo habkii loo doortey.
  - c) Liiska magacyada hoggaanka ku meel gaadhka ah ee ururka,
  - d) Xeer-**hoosaadka** ururka.
  - e) Caddeyn bixin cashuurta diiwaan gallinta oo dhan **150, 000,000** (Boqol iyo konton milyan) shillin Somaliland.
  - f) Xisbiyada qaran ee haysta shahaadada xisbi nimo lagama qaadayo cashuurta diwaan galinta.
  - g) Muddada liisanka ee xisbi qaran waa tobant (10) sanno oo ka bilaabma taariikhda liisanka la siiyay
2. Wuxuu waajib ah in lacagta cashuurtu caddahay in la wadaagey oo aysan ka bixin gacan qudha, waxaana dabagal ku samaynaya Guddida Diiwaangelinta.

**Qodobka 18aad**  
**Habaraaca qabashada codsiyada diiwaangelinta ururrada**

1. Guddidu waxa ay ku baahinaysaa warbaahinta dalka muddada qabashada codsiyada diiwaangelinta ururrada siyaasadeed iyo muddada dhammaadka qabashada codsiyada diiwaangelinta.



- Muddada qabashada codsiyada diiwaangelintu waa shan iyo afartan maalmood gudahood (45) oo bilaabmaysa maalinta guddidu ku baahiso warbaahinta qabashada codsiyada.
- Muddada ku cad faqradda 1aad ee qodobkan waa in urur kastaa ku soo buuxiyo shuruudaha ku qoran qodobka 17aad ee xeerkan.
- Marka ay dhammaato muddada qabashada araajida diiwaangelinta ururrada, Guddida Diiwaangalinta Ururada Siyyasiga ah iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka waxa ay muddo shan iyo tobant (15) maalmood gudahood ah ku hubinaysaa ururrada buuxiyey shuruudihii looga baahnnaa, waxayna siinayaan ogolaansho ku meelgaadh ah oo uu ururkaasi ku hawlgalo.

### **Qodobka 19aad**

#### **Shuruudaha u dejisan kala reebista ururrada haysta ogolaanshaha ku meel gaadhka ah**

- Ururrada buuxiya shuruudaha ku xusan qodobka 17aad ee xeerkan ee la siiyay ogolaanshaha ku meel gaadhka ah si'waafaqsan qodobka 18aad ee xeerkan, waxa waajib ku ah in uu u soo gudbiyo guddida:
  - Qabashadii shirweynaha ee ururka, meeshii uu ku qabtay, taariikhdi uu qabsoomay iyo wixii ugu weynaa ee ay qabteen, sida liiska magacyada xubnaha Golaha dhexe, Golaha Fulinta iyo magacyada hoggaanka xisbiga iyo xeer-hoosaadka ururka ee lagu ansixiyay shirwaynaha.
  - Caddeyn in ururkaasi ku leeyahay laamo hawlgal ah, ugana diiwaangashan yihiin ugu yaraan 1000 (Kun qof) xubnood gobol kasta, kuwaas oo haysta kaadhka codaynta (voter card).
  - Saddex (3) nuql oo daabacan oo ah xeekiisa iyo cinwaanadiisa gobollada iyo degmooyinka dalka.
- Mudada ururku ku qabanayo hawlaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waa 120 maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa taariikhda Guddidu siisay ogolaanshaha ku meel gaadhka ah sida ku cad qodobka 17aad faqraddiisa 4aad.

### **Qodobka 20aad**

#### **Habraaca hubinta in ururradu buuxiyeen shuruudaha u dejisan**

- Guddidu waa in ay hubiso in urur kastaa buuxiyay shuruudaha ku cad qodobka 18aad ee xeerkan.
- Guddidu waa in ay soo saarto jadwal ay ku booqanayso gobol walba si' ay u hubiso xubnaha diiwaangashan ee ururrada.
- Guddidu si ay u hubiso saxnaanshaha xubnaha kun ka qof (1000) ee ku cad faqradda 1aad ee qodobka 19aad ee xeerkan waxa ay xog iyo taageero waydiisan kartaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka si loo hubiyo in liiska la soo gudbiyay uu ku jiro diiwaanka cod-bixiyayaasha ee uu hayo Komishanka Doorashooyinku isla markaana in aan qofna ka diiwaangashanayn wax ka badan hal urur ama wax ka badan hal gobol.



4. Guddidu waxa ay qaadi kartaa tallaabo kasta oo aan ka hor imanayn xeerkan ama xeer kale oo dhaqan-gal ah oo ay ku hubinayso in urur kastaa buuxiyay shuruudaha ku cad qdobka 19aad ee xeerkan.

### **Qodobka 21aad**

#### **Shahaadada hawlalka ee ururrada iyo baahinta ururrada la diiwaangeliyay**

1. Guddidu marka ay deristo caddaymaha ku xusan qdobka 19aad ee xeerkan waxa ay go'aan ka gaadhaysaa:
  - b. Ururrada buuxiyay shuruudaha.
  - t. Ururrada ku guuldarraystay in ay buuxiyaan shuruudaha.
2. Marka ay soo saaraan go'aanka ku xusan faqradda 1aad ee qdobkan, gudidu waa in ay:
  - b. Ku qoraan diiwaanka ururrada buuxiyay shuruudaha;
  - t. Ku soo saaraan faafinta rasmiga ah iyo warbaahinta ururrada buuxiyay shuruudaha.
  - j. Siiyan shahaadada hawl-galka ururrada shuruudaha buuxiyay si' ay ugu hawlalaan inta doorashada laga gaadhayo.

X. U gudbiyaan Komsihanka Doorashooyinka ururrada buuxiyay shuruudaha ee u qalma in ay ka qaybgalaan tartanka doorasho ee loogu gudbaayo xisbinimada.

### **Qodobka 22aad**

#### **Waajibaadka saaran ururrada haysta shahaadada hawlalka**

1. Ururrada la siiyay shahaadada hawlalka ee u diyaar garoobaya doorashada, waxa waajib ku ah in ay soo saaran barnaamijkooda siyaasadeed oo ay la wadaagaan dadwaynaha iyaga oo ku faafinaya warbaahinta dalka.
2. Ururradu waa in ay xeer-hoosaadka, hoggaanka xisbiga, xubnaha golaha dhexe iyo golaha fullinta ee ay hore ugu gudbiyeen guddida ee ay tasdiiqisay, waa in ay u gudbiyaan Komishanka Doorashooyinka iyo Xeer-ilaaliyaha Guud muddo 30 maalmood gudahood ah laga bilaabo taariikhda la siiyay shahaada hawlalka.

### **Qodobka 23aad**

#### **Shuruudaha looga baahan yahay xisbiyada jira**

Xisbiyada Siyaasaddu waxa ay xaq u leeyihiin in ay u tartamaan doorashooyinka loogu tartamayo xisbi qaran si'waafaqsan Qodobka 16aad ee xeerkan, hase'yeshee waa in ay guddida diwaan gelinta u soo gudbiyaan arrimahan:-

- b) Magaca xisbiga oo dhammaystiran
- t) Ujeeddooyinka xisbiga.
- j) Qaab-dhismeedka xisbiga iyo waaxyaha uu ka kooban yahay.
- x) Xarunta dhexe ee xisbiga oo ah Somaliland gudaheeda oo uu yaalo liiska xubnaha Golaha Dhexe ee diwaangashan.
- Kh) Qaabka lagu soo doorto ama lagu beddeli karo, muddada xilka ee masuuliyiinta xisbiga.
- d) Shuruudaha xubinta lagu noqon karo iyo sababta lagu waayi karo iyo iscasillaadda xubinta ama masuulka.
- r) Qodobbo khuseeya sida xeer-hoosaadka xisbiga wax looga beddeli karo.



### **Qodobka 24aad**

#### **Isku biirista ururrada/xisbiyada doorashada ka hor**

1. Ururrada diiwaangashan iyo xisbiyadu waa isku biiri karaan 90 maalmood ka hor taariikhda doorashadu dhacayso.
2. Ururrada/xisbiyada isku biiray waa in ay u soo gudbiyaan Guddida Diiwaangelinta heshiiska isku biirista oo ay ansixiyeen golaha dhexe ee ururka/xisbiga.
3. Ururrada isku biira waxa ay yeelan karaan magaca iyo astaanta mid ka mid ah ururrada isku biiray ama waxa ay samaysan karaan magac iyo astaan cusub oo ka duwan magacyada ururrada kale.
4. Haddii urur iyo xisbi isku biirayaan, waxa la qaadanayaa magaca iyo astaanta xisbiga.
5. Guddida Diiwaangelintu marka ay hubiso in isku biirstu u dhacday sifo waafaqsan qodobkan, waxa ay baahinaysaa isku biirista islamarkaana waxa ay u gudbinaysaa xogta cusub Komishanka Doorashooyinka ugu danbayn 60 maalmood ka hor taariikhda doorashadu muddaysan tahay.

### **CUTUBKA 4AAD**

#### **DOORASHADA URURRADA IYO XISBIYADA SIYAASADEED**

### **Qodobka 25aad**

#### **Qabashada Tartanka Doorasho**

1. Komishanka Doorashooyinku marka uu helo liiska ururrada ay Gudida Diiwaangelintu siisay shahaadada hawlgalka ee u qalma in ay ka qayb galaan doorashooyinka sida ku cad qodobka 20aad ee xeerkan, waa in ay u qabtaan doorasho si'waafaqsan Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta Cod-bixiyaha, Xeer Lr. 91/2020.
2. Ka hor qabashada doorashada lagu sheegay faqradda sare ee qodobkan, Komishanka Doorashooyinka waa in ay cayintaa muddada dorashadaasi la qabanaayo ee ay dhacayso si'waafaqsan Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diwaangalinta Codbixiyeyaasha Xeer Lr.91/2020.

### **Qodobka 26aad**

#### **Bixinta liisanka xisbinimo**

1. Marka ay Maxkamadda Sare ku dhawaaqdo natijada kama danbaysta ah ee tartanka ururrada iyo xisbiyada, waxa Komishanka Doorashooyinku u gudbinayaa Guddida Diiwaangelinta natijada cod-bixinta iyo sida ay u kala heleen ururrada iyo xisbiyadu iyaga oo raacaya qaabka ku cad Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha.
2. Guddidu marka ay hesho natijada ku cad faqradda 1aad ee qodobkan waxa ay siinaysaa liisanka xisbinimo saddex urur/xisbi ee ku guulaystay natijada ee ay soo gudbiyeen Komishanka Doorashooyinku.



3. Liisanka xisbinimo waa toban (10) sannadood oo ka bilaabanta taariikhda Guddidu bixisay liisanka.
4. Liisanka xisbinimo waxa xisbi kasta uu xaq u siinayaa in uu ku tartamo laba kaltan doorasho madaxwayne.
5. Haddii muddo xileedka madaxwaynaha iyo ku-xigeenka loo kordhiyo si'waafaqsan Dastuurka iyo Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta Codbixiyayaasha iyada oo aan xisbiyadu dhammaysan labada kaltan doorasho ee ku cad faqradda 4aad ee qodobkan, muddada liisanka xisbinimo ee xisbiyaduna si toos ah (automatic) ayey u la kordhaysaa muddo kordhinta loo sameeyey Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa, ilaa labada kaltan doorasho Madaxwayne ay dhammaysanayaan xisbiyada liisanka haystaa.
6. Saddexda xisbiyo Qaran ee loo aqoonsado xisbiyo qaran waxa ay leeyihiin Shakhsiyad Qaanuuni ah (Legal Personality).
7. Si'waafaqsan qodobka 9aad, faqraddiisa 2aad ee Dastuurka JSL Saddexda xisbi qaran waxay ahaanayaan xisbiyo qaran ilaa inta ay ka dhacayo doorashada ay ku soo baxayaan saddexdii xisbi ee beddeli lahaa doorashadaas kaddib si'waafaqsan qodobbada Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha.
8. Haddii ay isku beegmaan muddada hawlalka ururradda iyo qabashada doorasho aan ahayn tii ururrada/xisbiyadu ku kala baxayeen, doorashadaasina muddadeeda lagu qabanayaa ay ka horrayso wakhtiga la'qabanaayo doorashada ururraddu kusoo baxayaan ee ay xisbiyo ugu gudbayaan, doorashadaas ay muddadeedu soo hormarayso waxaa ka qayb gali doona saddexda xisbi qaran ee markaasi jira oo kaliya.
9. Xisbiyadda liisanka xisbinimo qaataa, muddada xeerkan lagu sheegay ee liisankooda lagu cayimay waxa ay xaq u leeyihiin inta muddadaasi lagu gudo jiro in ay ka qayb-galaan doorasho kasta oo dalka ka dhacda muddadaasi dhexdeeda, iyada oo aan wax tixgalin ah la siin doonin muddada dhicitaanka liisankooda uga hadhsan.
10. Ururka siyaasadeed ee loo ansixiyo xisbi, kuma biiri karo xisbi kale doorashooyinka ka hor iyo kaddib, sidoo kale waa in ay xeerkiisa ku caddaataa in aan laga saari karin/eryi karin xisbiga xubin ama xubno loo doortey golayaasha sharciga ah haadii aanay ka hor imanayn xeerarka dalka iyo xeerka xisbiga.

#### **Qodobka 27aad**

#### **Xisbiga Dhaca ama ururka u gudbi waaya xisbi**

1. Xisbi/urur kasta oo ku guulaysan waaya doorashada loogu tartamayo xisbinimada si waafaqsan Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaangellinta Cod-bixinta waxa u bannaan in ay ku biiraan saddexda xisbi qaran ee soo baxay kay doonaan, waxayna qoraal ahaan ugu gubinayaan Guiddida Diiwaangalinta muddo aan ka badnayn hal bil (30 maal mood).
2. Ururka/xisbiga dhacaa ma laha wax shaqsiyad qaanuuni ah isla markaana ma hawlgeeli karo.
3. Haddii xisbigii mudanaha Golaha wakiilladu ama gole deegaan uu ka tirsanaa ku dhaco tartarka ururrada iyo xisbiyada waxa mudanuhu ku biiri karaa xisbiga uu doorto, wuxuuna dhammaysanayaan muddo xileed ka u hadhsan.



4. Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisu waxa ay dhammaysanayaan muddada xilkoqda inta uga hadhsan haddii xisbigoodu soo bixi waayo waxaana u furan in ay galaan xisbigay doonaan.
5. Haddii ay dhacdo xaaladda lagu sheegay faqradda 4aad ee qodobkan, Madaxweynaha iyo ku-xigeenkiisa waxa ka reebban in ay laba xisbi oo kala duwan galaan, balse waxaa waajib ku ah in ay hal xisbi si'wada jir ah u doortaan oo ay ka mid noqdaan.

## CUTUBKA 5AAD

### QODOBBADA LAGU DHAQAYO URURRADA IYO XISBIYADA

#### **Qodobka 28aad**

##### **Xuquuqda muwaaddiniinta**

1. Muwaaddin kasta oo qaangaadh ah, waxa uu xaq u leeyahay
  - a) In uu/inay ka qayb qaato hawlaha siyaasada
  - b) In uu/inay ku biiri karo xisbi ama urur siyaasadeed kuu/kay doonto.
2. Xubnaha ururku ama xisbigu waxa ay leeyihii xuquuqo isku mid ah xaqa doorashada iyo codayntaba marka lagu guda jiro xilliga doorashada xisbiga/ururka gudihiiisa.
3. Xubin kasta oo doonaysa in ay ka baxdo xil xisbi ama urur waa in xubinta xisbiga/ururku u soo gudbisaa arjiga is casilaadda oo qoraal ah, iyada oo ogaysiin siinaysa Guddida Diiwaangellinta Ururada.
4. Xubinna kama wada tirsanaan karto laba xisbi/urur ama xisbi iyo urur isla wakhti keliya.

#### **Qodobka 29aad**

##### **Diiwaanka xubnaha xisbiga/ururka**

1. Urur kasta iyo xisbi kastaa waa in uu leeyahay diiwaan uu ku qoro xubnaha ururka/xisbiga kaas oo ay ku caddahay magaca oo afraan ee qofka, laanta uu ka diiwaangashan yahay iyo sawirkiisa kurka ah.
2. Diiwaanka xubnaha ururka/xisbiga ee ku xusan qodobkan waa in urur kasta iyo xisbi kastaa uu u gudbiyo guddida.
3. Wax kasta oo iska beddela diiwaanka oo ay ka mid yihiin haddii xubini ka baxdo, waa in la ogaysiyo guddida si ay u diiwaangelliso.
4. Guddida waxa waajib ku ah in ay hayso diiwaanka xubnaha xisbi/urur kasta oo ay u geliso xog kasta oo daruuri ah si rasmi ah iyada oo isla markaasna si joogto ah kolba wixii kusoo kordha ama iska baddela ee xog ah diwaankaasi ku keydinaysa.

#### **Qodobka 30aad**

##### **Sababaha Lagu Waayi Karo Xubinnimada**

1. Xubin ka tirsan xisbi ama urur waxa ay xubinnimada ku waayi kartaa:
  - b. Geeri,
  - t. Is casilaad qoran oo xubintu u gudbiso degmada uu ka tirsan yahay.
  - j. Ay samaysato urur kale.



- x. Ay ka qayb qaadato urur kale oo la'samaynayo.
  - kh. Ay ku biirto urur/xisbi kale ama si caam ah ugu ololaysa samaysiga urur/xisbi kale.
  - d. Ay ku gafto xeerka u yaalla xisbiga/ururka, gefkaasi oo xeerka xisbigu/ururka u yaallaa uu si cad u tilmaamaayo in xubinimadda lagu waayi karo, sidaasna looga saaro hannaan waafaqsan xeerka xisbiga/ururka.
2. Habka looga saaraayo waxaa lagu faahfaahin doonaa xeer-hoosaadka u yaalla xisbiga/ururka, waana in aanu xeer-hoosaadka ururku/xisbigu ka hor iman Dastuurka iyo xeerarka doorashooyinka u gaarka ah.
  3. Xubinta laga saaro xisbi/urur ee cabasho ka qabta qaabka looga saaray wawa ay cabasho u gudbisansaysaa Gudida Diiwaangellinta oo ay waajib ku tahay in ay dhegaysato cabashada, jawaab celinta ka dibna ka soo saarto go'aan.
  4. Go'aanka guddida waxa looga rafcaan qaadan karaa Maxkamadda Sare.
  5. Go'aanka Maxkamadda Sarena waxa uu noqon doonaa go'aanka kama dambaysta ah ee dacwadaas.

### **Qodobka 31aad**

#### **Xuquuqda Xisbiyada iyo ururrada**

1. Xisbiyada/ururradu waxa ay xaq u leeyihiin:
  - b. In ay si siman u adeegsadaan warbaahinta Qaranka, waxayna yeelan karaan warbaahin u gaar ah marka ay ogolaansho ka helaan hay'adaha ku shaqada leh.
  - t. In ay si xor ah u gudbiyaan afkaartooda siyaasadeed iyaga oo aan wax u dhimayn shuruucda dalka, anshaxa iyo akhlaaqiyadka guud ee bulsho islaam ahi ku dhaqanto, iyo sidoo kale xasiloona, kala dambaynta iyo nabadjelyada guud ee dalka.
  - j. In aan la cabudhin karin masuuliyiinta xisbiyada ciidamada amaankuna aanay gali karin xarumohooda ilaa ogolaasho laga helo Maxkamadda awooda u leh,
  - x. In ay dhaliilaan Xukuumadda.
  - Kh. In ay yeeshaan hanti gaar ah.

### **Qodobka 32aad**

#### **Waajibaadka xisbiyada/ururrada**

1. Xisbi/urur kasta oo siyaasadeed waa inay barnaamijiisa ku caddaato qorshayaashan: -
  - b. Sugidda nabadjelyada, deganaanshaha iyo xasiloona dalka.
  - t. Horumarinta waxbarashada iyo Diinta
  - j. Horumarinta caafimaadka iyo fayo-dhawrka.
  - x. Daryeelka iyo ilaalinha degaanka.  
Ilaalinta warbaahinta madaxa banaa ee gaarka loo leeyahay
  - kh. Dhaqaaleyn ta iyo soo saaridda kheyraadka dabiiciga ah ee dalka
  - d. Horumarinta cilmiga iyo teknoolajiyada.
  - r. Dhiiri gelinta dhalinyarada iyo haweenka ee ka qayb qaadashada siyaasada dalka.
  - s. Ilaalinta Shareecda. Dastuurka iyo xeerarka dalka.

sh) xoojinta hannaanka dawladnimo ee daahafuran iyo isku xukunka nidaam dawli ah oo ku salaysan demoqraadiyad.



### **Qodobka 33aad**

#### **Waxyaabaha ka reebban Xisbiyada/Ururrada**

1. Waxa ka reebban xisbi/urur kasta in uu u soo gudbiyo guddida warbixin been ah ama khaldan.
2. Xisbina kama muuqan karto xeerarkiisa qodob ama qodobbo ka hor imanaya Dastuurka iyo Shareecada Islaamka.
3. Xisbi/urur kasta waxa ka reebban in uu dhaqaale ka helo illo shisheeye.
4. Xisbi/urur kasta waxa ka reebban in uu dhaqaale ka helo ururro loo aqoonsaday argagixiso ama si uun xidhiidh ula yeesho ururradaasi.
5. Xisbi/urur kasta waxa ka reebban in uu hantida Qaranka Somaliland u adeegsado ama u isticmaalo hawlihiisa u gaarka ah ee xisbinimo/ururnimo ama doorashooyinka.
6. Xisbi/urur kasta waxa ka reebban in uu ku kaco fal ka dhan ah Shareeca Islaamka, Dastuurka dalka iyo xeerarka kale ee qaranka ama ka hor imanaaya hab-dhaqanka, anshaxa iyo akhlaaqiyadka guud ee bulsho islaam ahi ay ku dhaqanto, kuwaas oo xeer ama shareecadu ay si cad u reebeen.
7. Si waafaqsan qodobka 9aad, faqradihiis 1aad iyo 2aad ee Dastuurka Qaranka, waxa ka reebban urur/xisbi kasta in uu ku kaco ama ku ololeeyo hab qabiilaysan ama gobollaysan ama ka hor imanaya mabaadii'da saldhigga u ah dimuquraadiyadda, hannaanka xisbiyada badan ama wax wadalahaanshaha siyaasiga ah ee bulshada ama falal kale oo kala qaybin kara bulshada oo liddi ku ah midnimada bulshada Somaliland.
8. Haddii xisbi/urur ku kaco falalka lagu soo sheegay faqradaaha sare ee qodobkan ama si kale loogu sheegay xeerkan qodobbadiisa kale waxa ka dhalanaaya anshaxmarin, waxaana loo raacayaa go'aanka anshaxa habraaca ay guddiyada doorashooyinka iyo diwaan galintu ay u dejyeen xisbiyada iyo ururrada siyaasadda hadba kay khuseyso shaqadaasi labada guddi.

### **Qodobka 34aad**

#### **Reebbanaan**

Uma bannaana qof kasta oo ka tirsan ciidammada kala duwan ee dalka nooc kasta oo ay yihin, Hay'adda Sirdoonka Qaranka, Shaqaalaha dowladda (civil servant), xubnaha ka tirsan Garsoorka, (Maxkamadaha iyo Xeer-ilaalinta) iyo Guddida Diiwaan galinta Ururada Siyaasada iyo Ansixinta Xisbiyada Qaranka in ay:

- b) Samaystaan Urur Siyaasadeed iyo xubin ka noqdaan urur/xisbi.
- t) In loo magacaabo xafiis urur/xisbi.
- j) Ku lug-yeelato arrimo Axsaab/Urur oo luminaaya dhex-dhexaadnimada xafiiska uu joogo.
- x) Taageerid ama ka-soo-hor-jeedsi Xisbi/Urur Siyaadadeed

### **Qodobka 35aad**

#### **Warbaahinta Xisbiga ama Ururka**

1. Xisbi/urur siyaasadeed waxa uu xaq u leeyahay in uu abuuro warbaahin uu gaar ah si' waafaqsan shuruucda iyo xeerarka dalka ee khuseeya warbaahinta gaarka ah.



2. Xisbi/urur siyaasadeed waxa ka mamnuuc ah in ay faafiyaan, daabacaan ama baahiyaan warar been ah, isla markaana abuuraaya kicin iyo iska hor imaad dadweyne, wiiqaaya midnimada dalka ama waxyeello u gaysanaaya nabadgelyada guud.
3. Xisbiyada/ururrada Siyaasaddu waxa ay si siman u isticmaalayaan warbaahinta ay dawladdu maamusho wakhtiga ololaha doorashooyinka Qaranka.

**Qodobka 36aad**  
**Hantida Xisbi/Urur**

1. Hantida Xisbi/urur waxa ay ka iman kartaa:
  - b. Qaadhaanka ay xubnaha Xisbi/urur bixiyaan.
  - t. Deeqda la'siiyay xisbiga/ururka waa in ay ka timaaddo shirkado waddani ah ama muwaadiniin reer Somaliland ah.
  - j. Kaalmo ay si siman u bixisay xukuummaddu.
2. Iyada oo la'raacayo xeer-hoosaadka xisbiga/ururka, waa in sannad kasta xisbiga/ururka lagu sameeyo hanti-dhawr madax-banaan. Han-tidhawrka waxa loo magacaabayaa hannaanka lagu caddeeyey xeer-hoosaadka ururka/xisbiga.
3. Waxa waajib ah in hanti-dhawrka ku xusan qodobkan uu yahay shirkad hanti-dhawr oo dalka ka diiwaangashan oo ka madax-bannaan ururka/xisbiga.
4. Natijada ka soo baxda hanti-dhawrka waa in loo gudbiyo:
  - b. Hoggaanka, golaha dhexe iyo shirwaynaha xisbiga/ururka.
  - t. Guddida Diiwaangelinta Ururrada.
5. Xisbigu/ururku waa in uu leeyahay hannaan xisaabeed oo gaar ah, isla markaasna daah-furan oo si'hufan loo hanti-dhawri karo.
6. Kaalmada xukuummaddu siiso xisbi waxa baadhitaan ku samayn kara Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka.
7. Wuxuu ka reebban Hanti-dhawraha Guud in uu baadho wax ka baxsan hantida xukuummaddu siiso xisbi.

**Qodobka 37aad**

**Waxyaabaha ka reebban Adeegsiga Deeqaha iyo Hantida Xisbiga/Ururka**

Hantida xisbiga looma isticmaali karo si toos ah ama si dadban in loogu qorsheeyo samaynta ganaci gaar loo leeyahay, ha'ahaato hanti guurto ah ama tu ma'guurto ahba iyo wax kasta oo ah dano shaqsi.

**Qodobka 38aad**  
**Xisaab-xidh**

1. Sannad-xisaabeedka xisbiyadu waa sannad oo ka bilaabanta bisha January illaa December sannadka.
2. Xisbi Qaran kastaa waxa uu samaynayaa xisaab-xidh sannadeed (dakhli iyo kharash) uu soo caddeeyay hanti-dhawre madax-bannaan, waxaana loo gudbinayaa Guddida Komishanka Doorashooyinka iyo Golaha Wakiillada ugu danbayn 31 March ee saannad kasta.



## CUTUBKA 6AAD

### XEER-HOOSAADKA, QAAB-DHIMEEDKA IYO SHAQADA URURRADA/XISBIYADA SIYAASADDA

#### Qodobka 39aad

##### Xeer-hoosaadka iyo Qaab-dhismeedka Ururrada Siyaasadda

1. Xisbi/urur kastaa waa in uu leeyahay xeer-hoosaad uu ansixiyay shirwaynaha ururka/xisbiga.
2. Xeer-hoosaadka ururka/xisbiga waxba kama beddeli karaan cid aan ahayn shirwayne.
3. Xisbigu/ururku waa in uu u soo gudbiyo gudida xeer-hoosaadka uu ansixiyay shirwaynuhu oo ay ku saxeexan yihiin shir-guddoonka shirwaynaha maallinta xigta maallinta uu dhammaado shirwaynuhu.
4. Iyada oo aan waxba loo dhimayn awoodda shirwaynuhu u leeyahay in uu qoro xeer-hoosaadka xisbiga/ururka xeer-hoosaadka ururrada/xisbiyada siyaasadda waa in ay ku cad yihiin waxyaalahani:
  - b. Magaca ururka/xisbiga oo dhammaystiran.
  - t. Ujeeddooyinka ururka/xisbiga.
  - j. Qaab-dhismeedka ururka/xisbiga.
  - x. Awoodaha qaybaha kala duwan ee xisbiga iyo hoggaankiisa.
  - kh. Qaabka lagu soo doorto ama lagu beddeli karo, muddada xilka ee masuuliyyiinta ururka.
  - d. Shuruudaha xubinta lagu noqon karo iyo sababta lagu waayi karo iyo is'casillaadda xubinta ama masuulka
  - r. Qodobbo khuseeya sida xeer-hoosaadka ururka wax looga beddeli karo.

#### Qodobka 40aad

##### Shirwaynaha Xisbiyada/ururrada

1. Xisbigu/ururku waa in uu yeesho shirwayne caadi ah shanti sannadood hal mar.
2. Shirwanaha ururku/xisbigu waa hay'adda ugu sarraysaysa ururka/xisbiga.
3. Xubnaha ergada ka qaybgalaysa shirwaynaha/ururku waa in ay yihiin xubno diiwaangashan oo ka mid ah ururka/xisbiga oo ku jira diiwaanka xubnimada ee ay hayso guddidu.
4. Xisbiyada haysta liisanka xisbinimo marka ay qabanayaan shirwayne waa in ay guddidu u soo gudbiyaan magacyda xubnaha ergada ah ugu danbayn shan iyo tobant (15) maalmood ka hor maalinta shirwaynuhu dhacayo si' guddidu u hubiso in ay yihiin xubnaha diiwaangashan ee xisbigu leeyahay.
5. Guddidu waxa ay goob joog ka noqonaysaa hawl socodiinta iyo habsami socodka shirwaynaha ururka/xisbiga si ay u hubiso in uu u dhacay si dimuquraadi ah oo daah-furan.
6. Wawa waajib ah in shirwaynuhu codkiisa ku dhiibto codbixin qarsoodi ah ama gacantaaga Marka uu Dooranayo hogaanka xisbiga.
7. Ururka/xisbiga ku qabsan waaya shirwaynaha shantii sanadood ba hal mar, waxa Hogaankoodu waayayaan sharcnimada xilakooda, waxaana shirwaynaha



xisbiga/ururka Qaban qaabinaysa Gudida Saddix billood ka hor muddada dhamaadka liisanka xisbi/urur. Iyada oo ka duulaysa xeer hoosaadka ururka/xisbiga iyo xubnaha Ururka/xisbiga ee Diiwaangashan.

8. Shirwaynaha aan caadiga ahayn ee xisbiga/ururka waxa soo jeedin kara guddoomiyaha ururka/xisbiga ama seddex meelood meel (1/3) ee xubnaha golaha dhexe ee xisbiga/ururka.
9. Hannaanka loo marayo shirwaynaha aan caadiga ahayn waxa uu la mid yahay shirwaynaha caadiga ah.
10. Wawa waajib ah in ergooyinka shirwaynuhu ay ka yimaaddaan gobollada iyo degmooyinka dalka iyo laamaha debedda.
11. Guddidu waxa ay dejinaysaa xeer-nidaamiyayaal iyo hagayaal lagu maamulayo shirwaynayaasha.

#### Qodobka 41aad

#### Shirarka Golaha Dhexe ee xisbiyada/ururrada

1. Xisbigu/ururku waa in uu yeesho shirka golaha dhexe ee caadiga ah sannadkii kasta hal mar.
2. Shirka golaha dhexe ee xisbiga/ururka waxa ka qayb geli kara oo keliya xubnaha golaha dhexe ee lagu doortay shirwaynihii u danbeeyey ee xisbiga/ururka ee Gudida Diiwaangelintu hayso magacyadooda.
3. Guddida waxa waajib ku ah in ay hubiso in xubnaha ka qaybgelaya shirka golaha dhexe ay yihiin kuwa ay hayso liiskeeda.
4. Wawa reebban in uu ka qaybgalo shirka golaha dhexe cid aan ku jirin golaha marka laga reebo xubnaha goob joogga ah oo aan lahayn cod.
5. Xeer-hoosaadka ururka/xisbiga waa in lagu caddeeyo cidda isugu yeedhi karta shirka aan caadiga ahayn.
6. Hannaanka loo marayo shirka golaha dhexe ee aan caadiga ahayn waxa uu la mid yahay shirka golaha dhexe ee caadiga ah.
7. Xubinta golaha dhexe ee loo diido in uu ka qaybgalo shirka golaha dhexe, waxa uu cabashadiisa u gudbinayaa guddida.
8. Xubinta aan ka mid ahayn ee ka qaybgasha shirka golaha dhexe waxa tallaabo ka qaadaysa guddida.

#### Qodobka 42aad

#### Hoggaamiyeasha Xisbi/Urur Siyaasadeed

1. Iyada oo aan waxba loo dhimayn shuruudaha gaarka ah ee ku xusan xeer-hoosaadka ururka/xisbiga, qofka isu sharraxaaya hoggaanka xisbi/urur siyaasadeed waa in uu buuxiyo shuruudahan:
  - b. Waa inuu/inay yahay muwaaddin reer Somaliland ah.
  - t. Waa in uu xubin ka yahay xisbiga/ururka si joogto ahna u bixin jiray qaadhaanka xisbiga/ururka ee sannadlaha ah.
  - j. Waa in/inay ay da'diisu tahay ugu yaraan 30 jir.
  - x. Waa in/inay aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ah fal-dambiyeed uu gaystay oo ka badan 3 (saddex) sanno 5tii sanno ee u dambaysay marka laga reebo in Madexweynaha JSL uu siiyay cafis.



Kh. Waa in/inay uu yahay qof muslin ah kuna dhaqma diinta Islaamka

1. Qofna Guddoomiye xisbi ma qaban karo wax ka badan laba muddo xileed.

### **Qodobka 43aad**

#### **Isbeddelka Hoggaanka iyo shuruucda Xisbiga/Uurka**

1. Isbeddel kasta oo lagu sameeyo hoggaanka, shuruucda iyo qaab-dhismeedka xisbiga/ururka waa in laga sheego warbaahinta ugu badnaan 15 maalmood gudahood marka uu xisbigu/ururku qabsado shirka uu ku gaadhay go'aanka isbeddelkaas.
2. Isla markaana waa in qoraal rasmi ah oo arrintaas ku saabsan loo diro **Guddida**, Xeeriilaalinta iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka muddo aan ka badnayn 15 maalmood.

### **Qodobka 44aad**

#### **Barnaamijka Siyaasadeed ee xisbiga/ ururka**

1. Ururku/Xisbigu waa in uu leeyahay barnaamij siyaasadeed oo faah faahsan kaas oo ku dhisan aragtida xisbiga/ururku leeyahay.
2. Barnaamijka siyaasadeed waa in xisbigu/ururku faafiyoo oo ka dhigo mid ay heli karaan dadwaynuhu.

### **Qodobka 45aad**

#### **Astaamaha iyo Magacyada**

1. Urur/xisbigu waa in uu leeyahay magac u gaar ah oo ka duwan magacyda ururrada/xisbiyada kale iyo astaan u gaar ah oo ka duwan astaanta ururrada/xisbiyada kale.
2. Wuxuu reebban in magaca urur/xisbi uu noqdo mid ku salaysan qabiil /gobol gaar ah ama xambaarsan sifooyin khilaafsan diinta ama wax u dhimi kara wadajirka iyo midnimada shacabka ama mid sita magaca hay'adaha qaran.

## **CUTUBKA 7AAD**

### **QODOBBO KALA DUWAN**

#### **Qodobka 46aad**

#### **Xallinta khilaafaadka**

1. Guddida Diiwaangelinta ayaa awood u leh ka garnaqista cabashooyinka ka soo baxa xisbi/urur dhexdiisa.
2. Dhinaca dacwadda qaba waxa uu dacwaddiisa oo qoran u gudbinayaa guddida isaga oo si cad u tilmaamaaya waxa uu ka cabanaayo nuxur ahaan, qodobbada sharci ee cabashadu ku sallaysan tahay iyo tallaabada uu rabo in guddidu qaaddo.
3. Guddida diiwaangelintu markuu helo dacwadda ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan, waxa uu gaadhsiinayaa dhinaca kale qoraalka dacwadda iyada oo la siinaayo dhinaca la'dacweeyey in uu kaga soo jawaabo toddoba (7) maalmood gudahood.



4. Guddidu marka ay hesho jawaab celinta dhinaca la dacweeyey waa in ay muddayso xilliga ay dhegaysanayso dood afeedka dhinacyada ayna qabanayso caddaymaha.
5. Marka ay guddidu dhegaysto dhinacyda waxa uu ka soo saaraya go'aan ku salaysan Xeerka Nidaamka Ururrada iyo Axsaabta Siyaasadeed ee Xeer Lr. 14/2011 iyo xeer-hoosaadka ururka/xisbiga dacwaddu ku saabsan tahay.
6. Go'aanka guddida ee ku xusan faqradda 5aad ee qodobkan waa in uu qoran yahay oo uu tilmaamo asbaabaha lagu saleeyey, qodobbada sharci ee guddidu u cuskatay iyo caddaymaha ay raacday.
7. Guddidu waa in ay go'aankeeda ku soo saarto ugu badnaan afar iyo tobant (14) maalmood gudahood marka ay dhegaysiga u danbaysa qaaddo.
8. Dhinacii ku qanci waaya go'aanka guddida diiwaan gelinta waxa u bannaan in uu racfaan u qaato Maxkamadda Sare soddon (30) maalmood gudahood.
9. Maxkamadda Sare waxa ay garta u qaadysaa dhegaysi furan oo waafaqsan hannaanka gar qaadista dacwadaha idaariga ah.
10. Xukunka Maxkamadda Sare waa kama danbays.
11. Haddii khilaafka faqradaha hore ku qorani yimaaddo inta aan ururka la diiwaan gelin ee aan aqoonsiga la siin, Guddida diiwaan-gelintu ma diiwaan gelinayso magaca ururka hoggaankiisa laysku khilaafay. Dhinacyadana waxa u bannaan in mid waliba gaarkiisa u samaysto urur kale oo aan la hayn magacii laysku qabsaday.

#### **Qodoboka 47aad**

##### **Ka cabashada go'aannada Guddida**

1. Guddida Diiwaangelintu waa in ay go'aamadeeda ka dhigto kuwo qoran oo la gaadhsiiyo cidda uu khuseeyo.
2. Cid kasta oo cabasho ka qabta go'aan ay soo saartay guddidu waxa uu racfaan uga qaadan karaan Maxkamadda Sare iyada oo la'raacayo Xeerka Nidaamka Garsoorka, gaar ahaan qodobbada khuseeya dacwadaha idaariga ah.

#### **Qodobka 48aad**

##### **Ganaaxa ku xad-gudubka xeerka**

Gudidu waxa ay ku soo rogaysaa xisbiga/ururka ku xadguduba qodob ama qodobo ka mid ah Xeerkan ganaax dhan 150, 000, 000 (boqol iyo kotan milyan SL SH) ilaa 300, 000 000 (sadex boqol oo milyan oo SL SH **oo lagu shubaayo khasnada dawlada**).

#### **Qodobka 49aad**

##### **Soo Saaridda Xeer-Nidaamiye (Power to Issue Regulations)**

Guddida Diwaangelinta Ururradda Siyaasadda iyo Ansixinta Xisbayada Qaranku waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro Xeer-nidaamiye (Regulations), Xeerka Hab-dhaqanka (Code of Conduct) iyo awaamiir (Directives) aan ka hor imanayn xeerka.

#### **Qodobka 50aad**

##### **Laalis**

Xeer kasta oo ka soo horjeeda xeerkani waa waxba kama jiraan (null and void).



## **Qodobka 51aad**

### **Qodobka xaaladda kala guurka (transitional clause)**

Xisbiyada la'siiyay shahaadada xisbinimo sannadkii 2012 iyo ururrada la diiwaangeliyay sannadkii 2022, waxa lagu dhaqayaa axkaamta qodobka 26aad ee xeerkan.

## **Qodobka 52aad.**

### **Dhaqan-galka**

Xeerkani waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Xeer-dejintu ansixiyaan Madaxweynuhuna saxeexo si'waafaqsan Dastuurka JSL.

---

**C/risaaq Siciid Ayaanle**  
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**

---

**Md. Yaasiin Maxamuud Xiir (Faratoon)**  
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**



# JIBOUTI



# SOMALILAND PROTECTORATE

